
# Mitral Regurgitation

Daboolka Dhiigga Aan Xirmeyn ama MR




Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404



© 2012 The Children's Heart Clinic

**Daboolka Dhiigga Aan Xirmeyn ama MR**
Mitral Regurgitation

Mitral regurgitation (Daboolka dhiigga aan xirmeyn ama MR) waa daadasho (dibu-noqosho) dhiig ay sababtiisu tahay dabooolka qalbacyada bidix hoose ilaa bidix kore in aysan gebi ahaan sidii laga rabay u xirmeyn. Dibu-noqoshada dhiigga waxa uu keenaa culeys aad u badan iyo barar ah qalbacyada bidix kore iyo bidix hoose. Heerka MR waa ay kala duwan yahay. MR wuu ku badan yahay mitral stenosis (dhuubashada daboolka) (ciriirka) (MS). MR inta badan waa lagu dhashaa oo waxaa lala xiriiriyaa atrioventricular septal defect (cilladda duleelka wadnaha ee qalbacyada kore iyo hoose ama AVSD), halbowlaha weyn ee dhiigga oo aan xirmeyn, wadne bararsan oo xuubku ka bukoodo ama Marfan Syndrome. MR waxay la xiriirtaa AVSD badanaa oo sababtuna waa dildilaac (kala-qeybsanaan) muruqa dhiigga xira. Haddii MR muddo dheer jirto, dhiigkarka sambabka ayaa keeni kara.

**Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:**

- Dhallaanka iyo carruurta laga helo MR khafiif ah badanaa waa calaamad la'aan.
- Daal iyo garaacis ah wadnaha ayaa dhici karta mararka qaarkood.
- Codka ugu horreeya ee wadnaha (S1) waa caadi. S2 ayaa si weyn u kala qeybsami karta oo waxaa gaabanaya soobixinta iyo xirista hore ee daboolka halbowlaha weyn. S3 qeylo ah ayaa sabab u noqon karta qulqulka dhiigga oo kaca marka la cabbirayo dhiigga kore. Guux ah dhiigga noqonayo ayaa laga maqli karaa cirifka sare oo wuxuu u gudbaya kilkisha bidix. Dhiigga kore ayaa dhawaaqiisa laga maqli karaa figta ugu sarreysa.
- Markuu xaalka MR daran yahay, qeylada figta ayaa garaac yeelaneysa.
- Qalbaca sare oo aan caadi ahayn ayaa ku dhaceysa qaangaarka, balse ilmaha dhif ayey ku tahay.

**Cilladsheegid:**

- <u>Raajada Xabadka:</u> Waxaa badanaa la arkaa unugweynaad ah qalbacyada kore iyo hoose.
- <u>EKG:</u> Cabbirka yar waa caadi. Unugweynaad ah qalbaca bidixe ama muuqasho ayaa MR ka dhigeysa dhexdhexaada illaa mid daran.
- <u>Uultarasawnka wadnaha:</u> Cilladsheegid.

**Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:**

- Bacterial endocarditis prophylaxis (antibiyootigga loo qaato bakteeriyada ama SBE) ee qalliin kasta oo ah ilkaha ka hor.
- Daawooyinka biyaha saara (Lasix) ama kuwa culeyska yareeya (enalapril, captopril) ayaa u fiican haddii wadnuhu soo saari waayo dhiigga si uu u bato dhiigga wadnaha ee soo baxaya.
- Qaliinka ayaa laga yaabaa in lagula taliyo. Daboollka inta badan waa la hagaajin karaa, oo dillaac ayaa la hagaajinayaa haddii uu jiro ama waxaa la adkeynayaa bartanka dhexe haddii loo baahdo. Xaaladaha qaarkood, lama hagaajin karo oo waxaa laga yaabaa in daboolka la beddelo (eeg <u>Bedelka Daboolka Dhiigga Aan Xirmeyn</u>). Dhakhtarka wadnaha ayaa kaala hadli doona baahi-da iyo wakhtiga qalliinka haddii loo baahdo.
- La-socosho wadnaha oo abaddan ah in lagu ogaado shaqada daboolka 6 ilaa12 bilood oo kasta.

**Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog/La-socoshada:**

- Daawada xinjirowga ee Coumadin iyo Aspirin ayaa loo qorayaa ilmaha loo geliyo aalad u noqota daboolka muruqa.
- Beddelka daboolka macmalka ah waa in loo qaato daawada aspirin.
- Carruurta qabta xanuunka qalbaca sare waa in loo qoro daawada garaaca iyo/ama xinjirowga.
- Bakteeriyada endocarditis prophylaxis ayaa looga baahan yahay bukaanada lagu sameeyay beddelka waalka mitral.


© 2012 The Children’s Heart Clinic